

Taageerida Ardayda Barata Ingiriiska ee Da'yarta ah Ayagoo Qiyaasaaya Walax

Shaybaarada Waxbarashada ee Gobalka Galbeed, Waqooyi galbeed, Waqooyi Bari iyo Jasiiradaha

Ka timid Xarunta Qaran ee Qiimaynta Waxbarashada ee IES

Qoysaska iyo daryeelayaasha, waxaad door muhiim ah ka ciyaaraysaa waxbarashada luuqada cunugaaga. Carruurta waxay baran karaan erayada cusub maalin kasta waxayna dhisi karaan erayo cusub ayagoo adeegsanaaya luuqada wax qeexida. Markaad ciyaaraysaan ciyaartaan adigga iyo cunugaaga ayaa adeegsan doona luuqad si aad u qeexdo una qiyaasto agabka guriga yaala ee aan muuqan.

Niyada kuhaay:

- Adigga iyo cunugaagu waxaad adeegsan kartaan luuqadaada hooyo ama Ingiriis, hadba kii kuugu xoog badan adigga.
- Ku barashada erayada cusub luuqadaada hooyo ayaa sidoo kale ka caawinaysa cunugaaga inuu barto Ingiriiska.
- Waqtigaan la qaado cunugaaga. Wax isla barashadu waa baashaal!

Maxaa loo barayaa erayada wax qeexa?

Ku hadalka iyo qorista ayadoo la adeegsanaayo erayada wax qeexa ayaa ka caawisa carruurta inay abuuraan eray bixintooda.

Aan ciyaarno ciyaarta wax qiyaasida!

Raac tallaabooyinka soo socda. Aan gadaal ka eegno taageerooyinka luuqada oo dheeraad ah.

Talaabada 1 aad: Ka caawi cunugaaga **inuu soo aruusho 5 waxyaabood** oo yaala guriga.

Talaabada 2 aad: Adeegso shaxda ku taalka dhabarka danbe **si aad uga caawiso cunugaaga qeexida sheey kasta**. Ku tababaro erayo badan oo kaladuwan oo ah kuwa qeexitaanka iskuna day erayo cusub. Soo jeedi erayo kuwaas ka adag sida *wax balaaran* halkii aad ka adeegsan lahayd *wax wayn*. **Ka caawi cunugaaga inuu barto erayada cusub ee qeexitaanka ah**. Qeex erayga, u adeegso inaad ku qeexdo sheey, aad ku bixiso tusaalayaal. Waydii cunugaaga haddii erayga loo adeegsan karo in lagu qeexo mid kasta oo kamid ah walxaha. Ku boori cunugaaga inuu adeegsado erayada qeexitaanka ah ee uu hadda bartay intaad ciyaarayso ciyaarta.

Talaabada 3 aad: **Adigga iyo cunugaagu mid kasta ha doorto 5 sheey oo dheeraad ah** kadibna ku hoos qari wax sida shukumaan, bokis, ama boorso si aan qofka kale u arkin.

Talaabada 4 aad: **Ka codso cunugaaga inuu doorto sheey kadibna waydii faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan sheeyga**. tusaale ahaan: *Intee le'eg yahay waynanka sheeygu?* Arag su'aalaha ku qoran dhabarka danbe ee bogga si aad u hesho fikrado. **Kadibna qiyaas** waxa sheeygu yahay.



Talaabada 5 aad: Hadda waa **tookadaada aad ku dooranaysay sheeyga aadna tusaalaha ku bixinaysay adoo adeegsanaaya erayada qeexitaanka**. kadibna cunugaaga ayaa su'aalo ku waydiinaaya kadibna qiyaasaaya sheeyga.

Talaabada 6 aad: **Ku celi tallaabooyinka 4 iyo 5** ilaa aad labadiinuba ka qiyaastaan dhammaan alaabaha.

Talaabada 7 aad: U sheeg cunugaaga **inuu sawiro, wax ka qoro, ama ka hadlo** mid kamid ah alaabaha.



Taageerooyinka Dheeraadka ah ee Luuqada

Cunugaaga ayaa dhisi kara eray bixintiisa kordhinaayana luuqadiisa asagoo adeegsanaaya erayada wax qeexa. Iskuday inaad adeegsato su'aalaha iyo jawaabaha hoose si aad ula qeexdo ulana qiyaasto waxyaabaha cunugaaga.

Su'aalaha aad ka waydiinayso Sheeyga	Dareemada Loo adeegsado Qeexitaanka	Jawaabaha Su'aalaha
Intee le'eg yahay waynanka sheeygu?	Waxa aad aragto : Xajmiga	Sheeyga (wayn/balaaran/yar/dhuuban).
Qaabka sheeyga?	Waxa aad aragto : Qaabka	Sheeygu waa (mid wareegsan/sadex xagal ah/ afar gees ah).
Waa maxay midabka sheeygu?	Waxa aad aragto : Midabka	Midabka sheeygu waa (casaan/buluug/jaalle/basali/oranji/cagaar/baroon/cadaan/beey).
Waa sidee camal sheeygu?	Waxa aad dareemayo : Qoraalka	Sheeygu wuxuu u egyptahay (mid buufsan/qalafsan/jilicsan/caarad dhuuban/caarad lej/jilicsan).
Waa maxay cufka sheeygu?	Waxa aad dareemayo : Miisaanka	Markaan qaado sheeyga, waa mid (culus/fudud)
Sidee u urayaa sheeygu?	Waxa aad uriso : Urka	Sheeygu wuxuu leeyahay ur (fiican/carfoon/macaan/macaan/adag/miro camal/xabah/qurmoon).
Waa sidee dhawaaqa sheeygu?	Waxa aad maqasho : Codka	Sheeygu waa mid (aamusan/aan sharqan lahayn/cod dheer/wuxuu sameeyaa codka dube garaaca).
Sidee sheeyga loo isticmaalaa? Maxaa sheeyga loo adeegsadaa?		Sheeyga waxaa loo adeegsadaa _____. Sheeyga waxaa loo adeegsadaa _____. Waxaan sheeyga adeegsaday markaan _____.



► Xujada Erayga

U sheeg cunugaaga inuu qoraal ka qoro sheey asagoo adeegsanaay erayo qeexitaan ah oo la xariira mid kasta oo kamid ah dareennada. U sheeg inuu qeexo sida sheeyga loo isticmaalo. U sheeg cunugaaga inuu akhriso qeexitaankiisa uuna qiyaaso waxa sheeygu qeexay.